



Rasuulka Ilaahay waxaan ka balaban qaadnay inaan maqalno oo adeecno, waqtiga adag iyo waqtiga fududba, iyo in nalaka sad roonaan karo

Cubaada Binu Saamit Allaha ka raali ahaadee wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay waxaan ka balaban qaadnay inaan maqalno oo adeecno, waqtiga adag iyo waqtiga fududba, iyo in nalaka sad roonaan karo, iyo inaan ku qabsan madaxtinimada dadka haaya, iyo inaan meel kasta oo aanu joogno xaqa sheegno, oo aanaan xaqa u sheegi waayin cabsi aan ka qabno mid daqaala daalki.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu scw wuxuu balan kaga qaaday asxaabtiisa inay u hogaansamaan madaxda waqtiga fudud iyo waqtiga adagba, waqtiga barwaaqada iyo waqtiga baahida la qabo, amarkoodu ha ahaado waxaan jecelnahay ama wax aan dhib sanayno, xataa haday madaxdu bulshada ka badasadaan xoolaha caamka ah, iyo shaqo isku maga caabida, iyo wixii la mida, waxaa waajib ah in lagu adeeco waxa wanaaga ah, iyo inaan laga hor iman madaxda, waayo fitnada iyo ladagaalan koodu wuu ka waynaan fasahaadka ka dhalanaya dulmiga ay sameeyaan, iyo wixii ay balan qaadeen oo ahaa inay xaqa sheegaan goob walba, iyagoo Ilaahay u daacad ah oo aan ka baqayn cid canaanata.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3061>

